

CCC-860 (01-11-23)	WAAXDA BEERAHA MAREYKANKA (U.S. DEPARTMENT OF AGRICULTURE) Shirkadda Deynta Badeecada	1A. Magaca iyo Cinwaanka Xafiiska Dagmada FSA (Koodka Xaafadda)	
SHAAHADEYNTA KUWA BULSHO AHAAN DIB U DHACAY, ILAHA KOOBAN, BEERELEYGA BILOWGA AH IYO CIIDANKA HAWLGABKA AMA SHAQAALAHA DAAQA		1B. Nambarka Telefoonka (Nambarka Lagu Galo Xaafadda)	1C. Brograamka Sannadka
		TILMAAMAHA: Dhamaystir Qeybaha A, B, C, D, iyo/ama E hadba sida loogu dabaqi karo. Akhri macluumaadka la xariira caddeynta been abuurka ee Qeybta F. Waxaad foomkaan ku soo celisaa cinwaanka ku qoran Qodobka 1 ee kor ku yaala.	
2. Magaca iyo Cinwaanka Arjiilaha			
MACLUUMAADKA: <i>Haddii hay'ad codsato in loo tixgeliyo in ay tahay mid "bulsho ahaan mid tabar darran," "ilo kooban," "ku sugan xaalad bilow ah" ama Beereleyga "ciidanka hawlgabka" ama shaqaalaha daaqa, hay'adda waa in ay la kullanto sifeynta ku qoran Bogga 2aad foomkaan. Beeralega ama shaqaalaha daaqa waxaa ka mid ah; "milkiileyaasha", "hawlwadenada" iyo "soo saareyaasha kale."</i>			
QEYBTA A - CADDEYNTA BEERELEYGA BULSHO AHAAN DIB U DHACAY AMA SHAQAALAHA DAAQA			
3. Waxaan caddeynaa in aan ahay xubin ka tirsan koox ku qoran <u>liiska hoose</u> , halkaas oo xubnahaas loo geystay takoorka isirka, soocidda jaadka qofka taasoo ku saleysan aqoonsigooda sida dadka xubnaha ka ah koox iyadoo aan la fiirin in tayada qofka uu leeyahay. (Calaamee dhamaan inta lagu dabaqi karo balse xasuuso in haddii "dumar" keliya la calaameeyo iyadoo aan la xullanin qeybta kale, xullashada ma ka dhigeysa arjiilaha mid bulsho ahaan, dib u dhacay xagga brograamyada			
<input type="checkbox"/> Dumarka. <input type="checkbox"/> Hindida Mareykanka ama Dhalladka kaAlaska, Aasiyaan ama Mareykanka Aasiyaanka, Mado ama Mareykanka Afrikaanka, Dhalladka Hawaii ama kuwa u dhashay Jasiiradaha Basifigga, Hisbanik.			
QEYBTA B - CADDEYNTA BEERELEYGA ILAHA KOOBAN AMA DUUR JOOGGA			
<i>Beeraleya ilaha kooban ama xaaladda shaqaalaha daaqa ku sugan yahay waxaa lagu ogaan karaa marka la isticmaalo bogga internetka laga heli karo Beeraleya Ilaha Kooban (Limited Resource Farmer) iyo Qalabka Ogaanta Qofka Daaqa Rancher Online Self-Determination Tool) ee laga helo Adeegga Dhaqaaleynta Ilaha Dabiiciga (Natural Resources Conservation Service) https://lrftool.sc.egov.usda.gov/.</i>			
<input type="checkbox"/> 4. Aniga waxaan caddeynaa in oraahda soo socoto tahay run, taasna waxaa ku muujiyay calameynta sanduuqa: Iibinta waxyaabaha tooska ama sida dadban uga soo baxo beerta, haddii lagu dabaqi karo hay'adda ama hawlaha wadajirka loo fulliyo kama badna xisaabta lagu tilmaamay Beeraleya Ilaha Kooban (Limited Resource Farmer)/Qalabka Qofka ku Ogaado Naftiisa ee Shaqaalaha Daaqa (Rancher Self-Determination Tool) ee 2da sanno isku xiga kana horeeya sannadka buuxa ee la canshuuri kara ka hor inta aan la gaarin sannadka brograamka munaasabka ah (fiiri Jadwalka 1 ee ku yaal Bogga 2 foomkaan), kor ahaan leysugu celceliyay sannoyinka dambe xagga sicir bararka guud. Dakhligeyga/Wadarta dakhliga reerkeena (shakhsiyaadka, haddii lagu dabaqi karo hay'adda ama wadajirka hawsha) wuxuu ku sugnaa ama yaraa heerka saboolnimada qaranka marka la soo qaado qoys ka kooban afar qof mid kasta oo ka mid ah 2dii sanno ee la soo dhaafay (fiiri Jadwalka 1aad, Bogga 2 foomkaan) ee kor la tixraacay.			
QEYBTA C – CADDEYNTA BEERELEYGA BILOWGA AH AM DUUR JOOGA			
<input type="checkbox"/> 5. Aniga waxaan caddeynaa in oraahyada soo socdo yahiin run kaddib marka aan calaameeyo sanduuqa iyo sheego taariikhda aan Aniga (ama haddii lagu dabaqi karo, hay'adda wadajirka hawsha) kama shaqeynin beer ama daaq in ka badan 10 sanno. Aniga (ama haddii lagu dabaqi karo, hay'adda ama wadajirka hawsha) waxaan si dhab uga qeybgalay hawsha.			
<hr/> <i>Taariikhda (Bisha/Sannadka la bilaabay tacabka)</i>			
QEYBTA D - CADDEYNTA BEERELEYGA CIIDANKA HAWLGABKA AMA DUUR JOOGA			
6. Aniga waxaan caddeynaa in aan ahay beeraley ama shaqaale ka shaqeyo daaqa ee ka soo shaqeyay Ciidamada Hubeysan sida ku sifeysan 38 U.S.C. 101(10) iyo waxaan buuxiyay sharuudaha ugu yaraan mid ka mid ah sanduuqyada hoose: (Calaamee dhamaan inta			
<input type="checkbox"/> A. Aniga (ama haddii lagu dabaqi karo, hay'adda ama wadajirka) aysan ka soo shaqeynin beer in ka badan 10 sanno iyo bilaabay tacabka			
<i>Taariikhda</i>			
<input type="checkbox"/> B. Aniga (ama haddii lagu dabaqi karo, hay'adda ama wadajirka hawsha) waxaan ahay ciidanka hawlgabka (sida ku sifeysan qaatay xaaladda ciidanka hawlgabka 10kii sanno ugu dambeyay ee			
<hr/> <i>Taariikhda (Bisha/Sannadka)</i>			

QEYBTA E - NAP FURSADDA CEYMISKA

Marka la soo gudbiyo caddeynta hoos timaado Qeybaha A, B, C, iyo/ama D, waxaad kaloo caddeysay in aad xaq u leedahay in lagaa dhaaf khidmadda adeegga laga bixiyo ceymiska musiibada la xariirta jeedaalka sida hoos timaado Brograamka Kaalmada Musiibada Jeedaalka aan ku Jirin Ceymis (Noninsured Crop Disaster Assistance Program) (NAP) lana xariira brograamka sannadka ee caddeyntaada lagu dabaqi karo. Dheeraad, heerarka sare ceymiska NAP waxaa xisaabaad la dhimay looga iibsan karaa Xafiiska Dagmada FSA aad ku sugan tahay. NAP waxaa qabta 7 CFR Part 1437 iyo Qodobada Aasaasiga NAP (NAP Basic Provisions), laganga helo: <https://www.fsa.usda.gov/programs-and-services/disaster-assistance-program/noninsured-crop-disaster-assistance/index>

Saxiixaada caddeyntaan waa arjiga aad ku soo dalbatid ceymiska musiibada NAP, iyo aqoonsi iyo helitaanka Qodobada ku saabsan waxa ka soo baxa beerta ee la ogol yahay lana xariira brograamka sannad kasta laguna dabaqi karo caddeyntaada, haddii aadan ka bixin ceymiska musiibada NAP xagga jeedaalka la ogol yahay ee ku jira Qodobka 7 hoos. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NAP, booqo xafiiska Dagmada FSA ee xaafadaada.

7. Haddii aadan dooneynin in aad ka qeybgashid NAP, waxaad calaamadda hubinta gelisaa gudaha sanduuqa lagu siiyay.
Waxaan doortay in aan ka baxo ceymiskeyga NAP

QEYBTA F - CIQAABTA BEEN ABUURKA SHAHADEYNTA

Ciqaabta caddeynta la been abuuray waa luminta dhamaan manaafacaadka sannadkaas lagu qaatay caddeynta beenta.

8A. Saxiixa Arjiilaha (Ee)

8B. Mansabka/Xariirka uu Qofka Saxiixa ee Wakiilka ah

8C. Taariikhda (BISHA-MAALINTA-SANNADKA)

XASUUSIN: *Bayaanka soo socdo wuxuu waafaqsan yahay Sharciga Asturnaanta (Privacy Act) 1974 (5 USC 552a – sida loo baddalay). Awoodda lagu codsado macluumaadka lagu tilmaamay foomkaan waa Sharciga Dastuurka Shirkadda Badeecada Deynta (Commodity Credit Corporation Charter Act) (15 U.S.C. 714 et seq.) iyo Sharciga Beerta (Agricultural Act) ee 2014 (Daabacaadda L. 113-79). Macluumaadka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu caddeeyo in qofka, hay'adda, ama wadajirka hawlgalada waa xubin bulsho ahaan ka tirsan koox dib u dhac qaba, wuxuu u leeyahay sida soo saaraha CCC ee ilaha kooban, waxaa loo aqoonsadaa sida beeraley bilow ah ama shaqaalaha daaqa ama waxaa loo aqoonsadaa sida beeraley ka tirsan ciidanka hawlgabka ama shaqaalaha daaqa. Macluumaadka laga soo aruuriyo foomkaan waxaa loo kashifi karaa wakaaladaha kale sida Federaalka, Gobolka, wakaaladaha dawladda hoose, wakaaladaha Qabaaalka; iyo hayadaha aan dawliga ahayn ee loo ogolaaday sida waafaqsan sharciga ama qaanuunka iyo/ama sida ku sharaxan qodobada lagu dabaqi karo ee Istitmaalka Caadiga (Routines Uses) ee ku tilmaaman Ogeysiiska Siistemyada Diiwaanka (System of Records) ee loogu talagalay USDA/FSA-2, Faylka Diiwaanada Beerta (Farma Records File) (laga dhigay automaatik) iyo USDA/FSA-14, Arjiilaha/Qaataha Deynta. Bixinta macluumaadka la soo codsaday waa wax uu qofka iskiisa u go'aansado. Hase ahaatee, haddii aan la keenin macluumaadka la codsaday, taasii waxay dhallin kartaa in la soo diido xaq u yeelashada kuwa bulsho ahaan ku sugan xaalad dib u dhac, ilo kooban, ama beeraley bilow ah ama manafacaadka brograam shaqaalaha daaqa.*

Bayaanka Sharciga Yareynta Warqadaha (PRA) Aruurinta macluumaadka waa laga dhaafay PRA sida ku sifeysan 7 U.S.C. 9091(c)(2)(B).

Oraahda Culeyska Saaran Dadweynaha (Sharciga Yareynta Warqadaha) Waqtiga loo baahan yahay in lagu dhamaystiro aruurinta macluumaadkaan marka leysku celceliyo waxaa lagu qiyaasaa 6 daqiiqo halkii jawaab, kana mid ah waqtiga lagu fiiriyo tilmaamaha, raadinta ilaha xogta jirta, aruurinta iyo xajinta xogta loo baahan yahay, iyo dhamaystirka iyo fiirinta aruurinta macluumaadka. Xagga CFAP, ERP Qeybta 1 iyo 2, iyo FSCSC, lagaama rabo in aad ka soo jawaabtid aruurintaan macluumaadka haddii aan la soo bandhigin nambaro kantarool OMB oo sax ah.

Sida waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga Federaalka iyo sharciyada iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga ee Waaxda Beeraha Mareykanka (U.S. Department of Agriculture) (USDA), Wakaaladaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalahaheeda, iyo hay'adaha ka qeybqaata ama maamula brograamyada USDA waxaa ka reeban in ay geystaan takoor ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, jinsi, jaadka qofka (kana mid ah hadalada ku saabsan jaadka qofka), jileeca jinsiga, itaal darrida, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska/waalidka, dakhliga ka soo gala brograamka kaalmada la siiyo dadweynaha, caqiidada siyaasadda, ama cadaadiska ama aar gudashada loo geysto qofka ku hawlan xuquuqda madaniga la soo dhaafay, qofka qaata brograamyada kaalmada ama hawlaha ay fulliso ama maal geliso USDA (ma aha in dhamaan lagu dabaqi karo dhamaan brograamyada). Taariikhda ugu dambeeyso ee la soo gudbiyo ashtakada iyo magdhawga waxay ku xeran tahay brograamka ama dhacdada.

Dadka itaalka darran ee u baahan habab kale oo lagu gaarsiiyo macluumaadka brograamka (tusaale, Braille, far waaweyn, cajal la maqlo, Luqadda Calaamadda Mareykanka (American Sign Language, iwm.) waa in ay la xariiraan Wakaaladda mas'uulka ka ahama Xarunta BARTILMAAMEEDKA USDA (USDA's TARGET Center, telefoonka (202) 720-2600 (codka iyo TTY) ama waxay USDA kala xariiri karaan Adeegga Lalliska Federaalka (Federal Relay Service) nambarka (800) 877-8339. Dheeraad, waxaa dhici karto in macluumaadka brograamka lagu helo luqado kale oo ka duwan Ingiriisi.

Si aad u soo gudbisid ashtakada takoorka brograamka, buuxi Foomka Ashtakada Takoorka Brograamka USDA (USDA Program Discrimination Complaint Form), AD-3027, lagana helo internetka http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html iyo xafiiska USDA ama waxaad warqad u qori kartaa USDA adiga oo warqadda ku sheega macluumaadka aad ku codsatay foomka. Si aad u codsatid koobiga foomka ashtakada, wac (866) 632-9992. Waxaad foomkaada oo dhamaystiran ama warqad u soo gudbisaa USDA ugu dambayn: (1) warqadaha: U.S. Department of Agriculture Office of the Assistant Secretary for Civil Rights 1400 Independence Avenue, SW Washington, D.C. 20250-9410; (2) fax: (202) 690-7442; ama (3) email: program.intake@usda.gov. USDA waa bixiye fursado siman, loo shaqeeye, iyo deymiye.

Sifeynta:**A. Beereleyga Bulsho Ahaan Dib u Dhacay ama Shaqaalaha Daaqa:**

Beereleyga bulsho ahaan dib u dhacay ama shaqaalaha daaqa waa beeraley ama shaqalaha daaqa ee xubinta ka ah koox xubnahooda loo geystay takoorka isirka, dhallashada, ama jaadka qofka taasoo ugu wacan aqoonsigooda sida xubno ka tirsan koox iyadoo aan la fiirin in sofooyinka qofka. Kooxaha waxaa ka mid ah: Hindida Mareykanka ama Dhalladka Alaska, Aasiyaan ama Mareykanka Aasiyaanka, Madow ama Mareykanka Afrikaanka, Dhalladka Hawaii ama kuwa u dhashay Jasiiradaha Basifigga, Hisbanik, iyo dumarka (kuwa doorta koox sida jaadka qofka). Xasuuso haddii arjiilaha uu keliya saxiixo "dumarka" iyadoo aan sidoo kale la xullanin qeybta kale xullashada ma ka dhigeysa arjiilaha in uu bulsho ahaan yahay mid dib u dhacay xagga brograamyada dhaqaaleynta.

Si hay'adaha soo codsada in loo aqoonsado sida beeraley bulsho ahaan dib u dhac ku sugan, ugu yaraan 50% hantida waa in ay leeyahiin beeraleyda bulsho ahaan dib u dhac ku sugan.

B. Beeraleyga Ilaha Kooban (Limited Resource Farmer) ama Shaqaalaha Daaqa (Rancher):

Beeraleyga ilaha kooban (limited resource farmer) ama shaqaalaha daaqa waa beeraley ama shaqaalaha daaqa la kulma labada shardi soo socda:

- Soo saare oo wadarta waxa uu toos ahaan ama si dadban uga soo saaro beerta aysan ka badanin qiyaasta sida ku tilmaaman Beeraleyga Ilaha Kooban (Limited Resource Farmer)/Qalabka Shaqaalaha Daaqa Naftiisa ku Ogaado (Rancher Self-Determination Tool)* mid kasta 2da sanno isku xiga ee ka horeyo sannadka la canshuuri karo ka hor inta aan la gaarin brograamka sannadka, kor leysugu celceliyo sannooyinka dambe xagga sicir bararka, iyo

Jadwalka laad: Jamlada Iibinta Tooska iyo Midda Dadban	
Brograamka Sannadka	Sannadaha
2017	2014 iyo 2015
2018	2015 iyo 2016
2019	2016 iyo 2017
2020	2017 iyo 2018

- Wadarta dakhliga soo gala reerka soo saaraha wuxuu aha ama ka yaraa heerka saboolnimada qaranka marka la soo qaado qoys ka kooban afar qof sannad kasta 2da sanno la soo dhaafay, tixraaca baragraafka (1) ee sifeyntaan.

**Beeraleyga ilaha kooban ama xaaladda shaqaalaha daaqa ku sugan yahay waxaa lagu ogaan karaa marka la isticmaalo bogga internetka laga heli karo Beeraleyga Ilaha Kooban (Limited Resource Farmer) iyo Qalabka Ogaanta Qofka Daaqa Rancher Online Self-Determination Tool) ee laga helo Adeegga Dhaqaaleynta Ilaha Dabiiciga (Natural Resources Conservation Service)*
<https://lrfiool.sc.egov.usda.gov/>.

Hay'adaha soo codsada in loo aqoonsado sida beeraley ilo kooban ama shaqaalaha daaqa, dhamaan xubnaha waa in ay ahadaan beeraley ilo kooban ama shaqaalaha daaqa.

Xasuusin: Sifeyntaan laguma dabaqi karo Brograamyada Deynta Beerta (Farm Loan Programs).

C. Beeraleyga Bilowga ah iyo Shaqaalaha Daaqa:

Beeraley bilowga ah ama shaqaalaha daaqa waa qof ama hay'ad marka labada qodob soo socdo ay yahiin run xagga beereleyga ama shaqaalaha daaqa:

- Ma ka shaqeynin beer ama daaq in ka badan 10 sanno, ama
- Maadiyan iyo si muuqata uga qeybgala hawlaha.

Si hay'adaha loo tixgeliyo in ay yaahiin beeraley bilow ah ama shaqaalaha daaqa, ugu yaraan 50% hantida waa in ay leeyahiin beeraley bilow ah ama shaqaalaha daaqa.

XASUUSIN: Ma aha in sifeyntaan la soo geliyay dhamaan sharuudaha Brograamyada Deynta Beerta (Farm Loan Programs).

D. Beeraleyga Hawlgabka ama Duur Jooggaha:

Beeraleyga ciidanka hawlgabka ama shaqaalaha daaqa waa beeraley ama shaqaalaha daaqa ee ka soo shaqeyay Ciidamada Hubeysan (sida ku sifeysan qeybta 101 (10) cutubka 38) kaasoo —

- Ma ka shaqeynin beer ama daaq in ka badan 10 sanno leysku darray, ama
- Haysto xaaladda ciidanka hawlgabka (sida ku sifeysan 38 U.S.C. 101(2)) 10kii sanno ugu dambeyay.

Si hay'adaha soo codsada in loo aqoonsado sida beeraley ka tirsan ciidanka hawlgabka ama shaqaale ka tirsan daaqa, ugu yaraan 50% hantida waa in ay leeyahiin beeraleyda ka tirsan ciidanka hawlgabka ama shaqaalaha daaqa.

E. NAP Fursadda Ceymiska:

Brograamka Kaalmada Musiibada Badarka aan Ceymiska ku jirin (Noninsured Crop Disaster Assistance Program) (NAP) wuxuu maaliyad ku kaalmeeyaa soo saareyaasha badarka marka soo saarka hoos u dhaco, khasaaro lala kulmo, ama soo baxaan wax hor istaaga abuurka taaso ugu wacan musiiboyinka dabiiciga. Badarka aan la ceymin karin waa kuwa aysan ceyminin Hay'adda Ceymiska Badarka FederAaalka (Federal Crop Insurance Corporation). Badarka la ogol yahay si loo qaato NAP waa miraha loo abuurto si looga ganacsado raashinka ama miraha (marka laga reebo xoolaha iyo waxa ka soo baxa), badeecada, iyo badarka warshadaha aan loo heli karin ceymis.

Ceymiska musiibada wuxuu la'eg yahay boqolkii 50 waxa aad ka fileysid in ay ka soo baxaan beerta iyo boqolkii 55 sicirka aad ka fileysid wax ka soo baxa beerta (loona yaqaan Aasaasiga 50/55) (Basid 50/55). Lagaama rabo in aad bixisid khidmad ama xisaab si aad u heshid ceymis ilaa heerkaan. Waxaa la heli karaa ceymis kale iyo heerar sare oo ceymis ah marka la bixiyo xisaabta. Si aad u heshid fursadahaan, waa in aad waqti ku habboon aad foomka CCC-471 (Arjiga NAP ee lagu dalbado Ceymiska) u soo gudbisid mid ka mid ah xafiisyada Dagmada FSA.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NAP, booqo bogga NAP ee FSA lagana helo:

<https://www.fsa.usda.gov/programs-and-services/disaster-assistance-program/noninsured-crop-disaster-assistance/index>